

## **Tusaalayn la xiriira filimada ku saabsan mowduuca, haddii uu gubto gurigaagu – maxaad yeeliysaa?**

Sanad kasta waxaa gubto dalka Iswiidan guryo qiyaas ahaan ku dhow 6000. Dad aan ka yarayn 1000 ayaa ku dhaawacma, waxaana ku dhinta dababkaasi dad ku dhow 120. Taasi oo micnaheedu yahay in khasaare dhimasho, dhaawac iyo dhaqaaleba uu bulshada u keeno. Haddaba waxaa muhiim ah in aad garanayso tallaabooyinka habboon, haddiiba ay dhacdo in dab ka kaco gurigaaga. Filmkani waa hab aad ku baranayo, sida loo dhaqmo haddii uu dab qabsado gurigaaga.

Filimkan waxaa ku jira guri dabaqyo ah oo gubanaya – Sidee baad u dhaqamaysaa? Waxaanu dabagal ku samaynay dhowr qoys oo ku wada nool guri dabaqyo ah oo marin jarjanjar ah oo kala hooseeya leh, kuna yaal meel Dalka Iswiidan ka mid ah. *Wakhtigu waa galab. Dadka guryaha deggennina, waxay samaysanayaa casho. Mid ka mid ah guryaha ayaa aabbihii ku illoobay daawe shooladdii. Saliiddii ku jirtay daawaha ayaa dab qabsaday, waxaana jikadii ka billaabmay dab.*

Filimka wuu gubanayaa gurigaagu – sidee baad u dhaqamaysaa? Waxaa lagu metelayaa guri fiilla *oo laba dabaq ah*. Gabar ka mid ah carruurta qoyska oo timaheeda ka shaqeynaysa, ayaa ku iloopday korontada makiinada timaha lagu buufiyo hawada kulul.

Birtii ku jirtay waa kululaatay, waxayna dab qabadsiisay kursi. Qoyska intii kale, waxay joogaan dabaqa sare, marka guriga dabku ku faafay.

Labadan qoysba waxay hor yaal su'aasha ah: Maxaad samayn lahaydeen, haddii ay idinku dhacdo sidaas oo kale, idinka? *Ujeedada filimadani waa in aad fahmtid, wixii aad yeeli lahayd, haddii uu dab ka billaabmo guri dabaq ah ama guri fiilla ah.*

### **Tus filmkan koox**

Filimka waxaa loogu talogalay dhalinyarada iyo dadka waaweyn ee u baahan in ogaadaan, oo bartaan, wixii ay yeeli lahaayeen, haddii uu dab ka kaco guriga ay ku nool yihiin. Tusaaleyntan waxaad ka helaysaa hindisayaal ku tusaya sida

aad ugu shaqeynaysaan filimada. Tusaaleyntan waxaa lagu isticmaali karaa labada filimba. Leyliyo iyo maclumaadka saldhiga u ahna, waxay ku jiraan dhokomentigaaga.



Calaamaddan micnaheedu waxaa uu tahay in maclumaadka iyo leyliyadu ay la xiriirraan fiillada ama guryaha isdaba yaal ah *radhus*.

### **Ujeeddo: waxyabahan baa laga baranaaa filinka**

Marka daawataan ee dhammaysataan, waa in ka qeybgalayaasha kooxdu ayogaadaan:

- Sida loo damiyo dab qabsaday digsi ama daawe.
- Waxay samayn lahaayeen haddii uu dab qabsado gurigaaga dabaq ah.
- Sida aad yeeli lahayd haddii uu dab ka kaco guri deris aad tiiin.
- Sidii aad yeeli lahayd haddii uu qiiq leeyahay marinka jarajarta ah ee laga daadegayo.



- Sidee wax loogu damiyaa qalabka dabdamiska ee gacanta lagu qaado.



- Sidee baad yeelaysaan haddii uu dab ka bilaabmo guri fiilla ah ama kuwa is daba taxan *radhuset*.

### **Sidan samee**

1. Dooro filinka ku habboon kooxdan. Ma waxay deggen yihii guryo dabaqyo ah oo iskor saaran mise guri caadi ah? Wakhtiga ma laga gaarayaa daawashada hal filin mise labada way daawan karaan? Haddii aad tusaysid filinka ku saabsan guriyaha dabaqa ah, hubi dadkani inay wada deggan yihii hal marin oo jarajaro ah oo ka dhixeyso.
2. Horta adigu filinka dhowr goor daawo. Go'aanso in aad filinka hal mar wada tusaysid ama aad doonaysid in aad joojisid, marka la marayo dhacdooyin gaar ah.
3. Ma u baahan tahay maclumaadka saldhiga u ah dabka guryaha, akhriso qoraalka, *su'aallo iyo jawaabo ku saabsan dabka guryaha*
4. U sheeg kooxda in aad tusaysid filin ka hadlaaya, waxa la sameeyo, haddii uu dab qabsado guriga.

5. Weydii haddii uu jiro qof leh waayo aragnimo mar uu dab qabsaday gurigiisa. U ogolow in qofkaasi ka sheekeeyo waayo aragnimadiisa.
6. Daawadsii filinka.
7. U xul hal ama dhowr ka mid ah layliyada, si aad u ogaatid wax ay kooxdu baratay. Layliyadu waxay kuugu jiraan dhokomentigaaga.